



Tilmaanbixinta muddada karantiinka iyo goonni ku haynta

Dagganaheenna sharafta lahow. Waxaa lagu go'aamiyay karantiin ama goonni ku hayn, si loo maareeyo oo loo xakameeyo fiditaanka fayraska korona. Waa muhiim, inaad raacdo tilmaanbixinta la xiriirta muddada karantiinka iyo goonni ku haynta oo aadan qaadda dadka kale xanuunka suuraggalka ah.

Waa maxay karantiin iyo goonni ku hayn?

Karantiinku waa fal waxqabad oo waafaqsan sharciga u yaalla cudurrada faafa, kaasoo lagu xakamaynayo baahidda cudurrada faafa. Karantiinka micnihiisu waa xadaynta madaxbannaanida dhaqdhaqaaqa qof caafimaad qaba, maadaama cudurrada infakshanku ay faafi karaan ka hor intaysan calaamadaha cudurku soo ifbixin ama dillaacin. Karantiinka waxaa looga hortagaa qaadista suuraggalka ah ee ay dad kale cudurka ku qaadi karaan.

Karantiin ku soo rogiddu macnaheedu ma aha, inaad xanuunka qaadday. Waa hawl taxaddar ahaaneed oo lagu xadaynayo dhaqdhaqaaqaaga, ilaa laga ogaanayo, in fayraska u dagnaantiisu ama u dayacnaantiisu ay sababtay qaadista xanuunka. Xaaladda qoyskaagu waxay noqon kartaa, in hal qof oo kaliya uu karantiin ku jiro. Markaas qoyska intiisa kale caadi bay hawlahooda u qabsan karaan. Haddii muddada karantiinka aad isku aragtid calaamadaha xanuunka, habkii lagu ballamay ula xiriir daryeelka caafimaadka.

Goonni ku haynta iyada waxaa loola jeedaa, in bukaanka cudurka qaaday gaar looga saaro dadka caafimaadka qaba. Isbitaalka ka sokow, goonni ku haynta gurigana waa lagu fulin karaa.

Sida ku xusan sharciga cudurrada faafa (1227/2016), goonni ku haynta ama karantiinka waxaa dagganayaasha ku soo rogi kara dhakhtarka cudurrada faafa ee degmada ama daryeelka caafimaad ee degaanka. Magaalada Jyväskylä go'aankeeda rasmiga ah ee ku aaddan karantiinka ama goonni ku haynta waxaa si gaar ah laguugu soo hagaajinayaa boostada. Farriintaas waxaa laguugu soo raacinayaa caddaynta fasaxa jirrada, taasoo haddii baahideedu jirto aad lacag maalmeed Kela uga dalban kartid.

Maxaa la samayn karaa ama aan la samayn karin muddada karantiinka iyo goonni ku haynta lagu jiro?

Qofka lagu soo rogay karantiin ama goonni ku hayn waa inuu guriga joogo. Guriga dad marti ah uguma imaan karaan oo isaguna asxaabtiisa ma soo booqan karo.

Fiiro gaar ah u yeesha, in qoyskiinna uu ku jiro karo qof aan karantiin ama goonni ku hayn lagu soo rogin. Si caadi ah bay hawlahooda u qabsan karaan oo tilmaanbixintan iyaga ma khusayso.



Sosiaali- ja terveystalvelut

Bannaanka lugabaxsi waa loo aadi karaa, waase inaan dadka kale aad loogu dhowaan. Marka bannaanka la joogo, waa in dadka waddada la isaga hor imaanayo 2 mitir ama laba tallaabo loo jirsado.

Dhismayaasha gudahooda, sida dukaammada, farmashiyayaasha, rugaha caafimaadka, goobaha shaqo, xannaanooyinka carruurta, iskuullada, maktabadaha, makhaayadaha iyo munaasabadaha dadku isugu yimaadaan lama tagi karo wakhtiga karantiinka lagu jiro.

Ka taxaddar nadaafadda gacmaha! Gacmo qaawan ha ku taaban xayndaabka jaranjaradaada ama gacmaha albaabbada. Haddii aad qashin soo tuuraysid ama aad warqad sanduuqa boostada ku soo ridaysid, gacangashi isticmaal, marka aad albaabbada gacmahooda ama daboollada taabanaysid.

Qufacaaga ilaali oo markaad qufacaysid, safaleeti nadiif ah ama laabatada gacantaada afka ku dabool. Ha ku quficin meelaha ama dulaha ay dadka kale taaban karaan. Fayraska korona waa cudur hindhiso ama qufac ku faafa oo sida cilmibaarisyadu sheegayaan, ilaa dhowr maalmood buu dulaha ku noolaan karaa.

Dukaanka cuntada ama farmashiyaha tagitaankiisa waxaad tusaale ahaan caawimaad u weyddiisan kartaa deriska ama qaraabada. Adeegga waxay kuu dhigi karaan gurigaaga hortiisa.

Dukaammada Jyväskylä waxay leeyihiin adeegyo kala duwan oo guryaha wax la iskugu keeno. Haddii aad isticmaashid adeegyada ay dukaammadu bixiyaan, masuuliyadda ku saaran waa inaad lacagta adeegga hormaris ahaan u sii bixisid oo aad kala sii ballantid, in adeegga guriga hortiisa lagu dhigo.

Sidoo kale farmashiyaashuna waxay leeyihiin adeeg internet wax ku iibsasho ah. Haddii aad isticmaashid adeegyada noocaas ah ee farmishiyayaasha, masuuliyadda ku saaran waa inaad lacagta adeegga hormaris ahaan u sii bixisid oo aad kala sii ballantid, in adeegga guriga hortiisa lagu dhigo.

Haddii aad weysid qaraabo ama deris dukaammada kaaga soo adeega ama daawo farmashiyaha kaaga keena, la xiriir nambarka telefoon ee magaalada Jyväskylä ay adeegyadeeda isugu gaysay oo kala ballan fulinta adeegyada.

- Magaaladu waxay maalmaha shaqada, sacaadaha 8-16, telefoonka 014 266 0550 talasiin ugu fidinaysaa dadka karantiinka ku jira ee u baahan adeegyada dukaammada iyo farmashiyayaasha. Hadafku waa sidii telefoonada loo qaban lahaa maalmaha shaqada, hadba siday suuraggal u noqoto.
- Wakhtiyada kalana waxaa caawimaad laga heli karaa telefoonka heeganka arrimaha bulshada 014 266 0149.

Haynta carruurta, haddii ay waalidku xanuunsadaan

Haddii qoyskaagu uu goonni u hayn ku jiro oo waalidka ama cidda kale ee masuulka ah uu xanuunkoodu gaarsiisanyahay, inaysan carruurta hayn karin amaba ay iyaguba isbitaal galaan, carruurta hayntooda waxaa caawimaad looga heli karaa adeegyada magaalada Jyväskylä.

- Caawimaad ku aaddan haynta carruurta oo ay keentay xaalad karantiin ama gooni ku hayn waxaa lagala xiriiri karaa maalmaha shaqada, saacadaha 8-16, telefoonka 014 266 0550.

Sosiaali- ja terveystalvelut

- Wakhtiyada intaas ka baxsan waxaa lala xiriirayaa telefoonka heeganka arrimaha bulshada t. 014 266 0149.

Xannaanooyinka carruurta iyo dugsiyada waxbarashada aasaasiga ah muddada lagu jiro karantiinka ama goonni ku haynta

Haddii ilmo taga xannaanada carruurta ama barbaarinta hore lagu soo rogo karantiin ama uu xanuunsado ama goonni ku hayn ku jiro, kharashka xannaanada ee muddadaas laguma soo dallacayo. Kala xiriir xannaanada arrimaha ku saabsan hakinta kharash bixinta, haddii ilmahaaga lagu soo rogay karantiin ama uu xanuunsado ama goonni ku hayn ku jiro.

Dugsiga ama iskuulka uu ilmahaagu dhigto ayaad ka helaysaa warbixin ku aaddan, habka waxbarashada loo qabanqaabinayo, muddada uu ilmuhu ku jiro karantiinka ama goonni ku haynta. Haddii ilmahaagu uu ku jiro karantiin ama uu xanuunsado oo goonni ku hayn lagu soo rogo, Wilma kala xiriir macallinka ilmahaaga. Muddada uu ilmuhu iskuulka ka maqanyahay, casharrada iyo tilmaanbixintoodaba waxaa guud ahaan la soo dhigayaa Wilma.

Haddii ilmo Jälkkäri ku jira lagu soo rogo karantiin ama uu xanuunsado oo goonni ku hayn ku jiro, kharashka Jälkkäri ee wakhtigaas lama soo dallacayo. La socodsii Jälkkäri maqnaanshaha ilmahaaga, si kharashka loo hakiyo.

Lacag maalmeedka cudurrada faafa waxaa lagu daboolayaa dhaqaalaha nololmaalmeedka

Lacag maalmeedka cudurrada faafa ee muddada goonni ku haynta ama karantiinka waxaa laga bixinayaa Kela, tilmaanbixin arrimahaas ku saabsanna waxaa laga helayaa boggan internetka: <https://www.kela.fi/tartuntatauti>.

Boggaas internetka waxaa sidoo kale laga buuxin karaa foomka lagu codsanayo lacag maalmeedka. Codsiga waxaa lagaaga baahanyahay

- go'aanka dhakhtarka degmada u qaabbilsan cudurrada faafa uu ku caddaynayo shaqo ka maqnaanshaha ama
- Caddayn dhakhtareedka A (A-lääkärintodistus), taasoo ay ku cadyihiin sababaha shaqo ka maqnaanshaha oo ku saxiixanyahay dhakhtarka u xilsaaran cudurrada faafa. Go'aanku farriintan ayuu ku lifaaqanyahay.
- Sidoo kale codsiga waa in lagu soo qoro macluumaadka shaqabixiyaha. Kela waxay shaqabixiyahaaga ka codsan doontaa, caddadka mushaarka baaqday.

Lacag maalmeedka cudurrada faafa ayaa lagu kabayaa baaqashada mushaarka, haddii lagugu amro, inaad shaqada u imaanin sababo la xiriira karantiin ama goonni ku hayn looga hortagayo faafidda cudurka. Waad heli kartaa lacag maalmeedka cudurrada faafa, adigoo xitaa shaqo awoodid la'aan ku haynin.

Haddii aad tahay waalid haysta ilmo 16-jir ka yar, waad heli kartaa lacag maalmeedka cudurrada faafa, haddii ilmahaaga guri joogis loogu soo rogo sababo la xiriira cudurrada faafa oo aad sidaan darteed shaqadaada uu aadi kari weysid.

Sosiaali- ja terveystalvet**Lacag maalmeedka cudurrada faafa waa caddad buuxa oo daboolaya mushaar baaqashada**

Haddii aad mushaarle tahay, lacag maalmeedkaagu waxay waafaqsanaanaysaa mushaarka aad heli lahayd, haddii aan lagugu amri lahayn, inaad shaqada ka maqnaatid.

Haddii aad ganacsade tahay, lacag maalmeedku waxay waafaqsanaanaysaa YEL ama MYEL ee dakhli sannadeedka ku salaysan, taasoo dhaqangalaysa, markii uu maqnaanshuhu bilowdo.

Haddii aad tahay shaqo la'aan, arday ama qof gurigiisa dhaqanaya, ma heli kartid lacag maalmeedka cudurrada faafa, maadaama aysan mushaar baaqasho kula soo gudboonaanin. Haddiise dhakhtarkaagu soo caddeeyo inaad cudurka faafa awgiis shaqo u awoodin, waxaad codsan kartaa lacag maalmeedka bukaanka.

Haddii waxbarashadaada ka sokow aad shaqaysid ama adigoo shaqo la'aan ah marmarka qaarkood shaqaysid oo cudurka faafa awgiis lagugu amro, inaad shaqada ka joogtid, qaybtaas xaq waad ugu yeelan kartaa lacag maalmeedka cudurrada faafa.

Lacag maalmeedka cudurrada faafa waxaa laga bixinayaa muddada go'aanka shaqo ka maqnaanshaha oo dhan, iyadoo aysan jirin wakhti ugu badnaan ah

Haddii aad markii hore caddayn u heshay lacag maalmeedka bukaanka oo Kela ay sidaas kuugu oggolaatay lacag maalmeedka bukaanka, go'aankaas waa la sixi karaa oo muddadaas waxaa la bixin karaa lacag maalmeedka cudurrada faafa oo go'aankeedu khuseeyo shaqo ka maqnaansha. Dhakhtarka u xilsaaran cudurrada faafa ayaa qoraya go'aanka shaqo ka maqnaanshaha, goonni ku haynta ama karantiinka, ama caddayn dhakhtareedka A oo isla macluumaadkaasi ay ku yaalliin, sidoo kale wakhtigi la soo dhaafayna waa laga soo bilaabayaa.

Caddadka iyo bixinta

Haddii aad mushaarle tahay, lacag maalmeedka cudurrada faafa waxay waafaqsanaanaysaa warbixinta uu shaqabixiyuhu soo gudbiyo.

Lacag maalmeedka cudurrada faafa waxay u dhigantaa mushaarka kaa baaqday. Haddii aad shaqo kale qabatid ama aad shaqadaada qayb ahaan qabatid, lacag maalmeedka cudurrada faafa waxaad ka helaysaa, in le'eg mushaarka kaa baaqday.

Haddii aad ganacsade tahay, lacag maalmeedka cudurrada faafa waxay waafaqsanaanaysaa YEL ama MYEL ee dakhli sannadeedka ku salaysan. Haddii aad ku khasbantahay qaadashada caymisyada YEL ama MYEL, caddadku wuxuu waafaqsanaanayaa dakhliga meheradda ama dakhliga mushaarka ee ganacsigaaga ka yimaada.

Sosiaali- ja terveystalvelut**Maalmaha lacag qaadashada**

Lacag maalmeedka cudurrada faafa dib ayaa xilli kharash bixin ahaaneed loogu bixiyaa. Xilliga ama wakhtiga koowaad ee kharash bixintu waa 6 maalin shaqo, wakhtiyada kharash bixinta ee xigana waa 25 maalin shaqo. Qaybta ugu dambaysa ee lacag maalmeedka cudurrada faafa waxaa la bixinayaa, markii xuquuqdaas danta dhaqaale ku salaysan ay dhammaato.

Adeegyada ka soo danaysashada Kela ayaad ka arki kartaa maalinta xigta ee lacag maalmeedka cudurrada faafa ay kuu soo dhacayso.

Qayb lacag maalmeedka cudurrada faafa ka mid ah oo shaqabixiyaha loo shubi karo ayaa jirta, waana qaybta uu mushaar ahaanta u bixiyay muddadii shaqo ka maqnaanshaha.

Lacag maalmeedka cudurrada faafa bixinteedu waxay soconaysaa ilaa intuu ka jiro go'aanka shaqo ka maqnaanshaha, karantiinka ama goonni ku haynta. Lacag maalmeedka cudurrada faafa waxaa loo canshuuraa sida lacag maalmeedka bukaanka.

Muddada qaybta waajibka ah

Lacag maalmeedka cudurrada faafa ma laha muddo qaybteedu waajib tahay.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan arrimaha lacag maalmeedka:

<https://www.kela.fi/tartuntatauti>

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada magaalada Jyväskylä:

www.jyvaskyla.fi/terveys/korona

Hagista adeegyada caafimaadka:

- Haddii aad qabto su'aalo caafimaadka la xiriiira ama xaaladdaada caafimaad is beddesho, ugu horrayntii la xiriir dhakhtarka ku qaabbilsan, adigoo raacaya tilmaanbixinta lagu siiyay.
- Sidoo kale waxaad la soo xiriiri kartaa adeegyada la isu geeyay ee Jyväskylä, Hankasalmi iyo Uurainen, adigoo maalmaha isniin-khamiis saacadaha 8-16 iyo jimcayaasha saacadaha 9-16 soo wacaya telefoonka hagista oo ah 014 266 0133.
- Wakhtiyada ka baxsan xilliga shaqada soo wac telefoonka heeganka oo ah 116 117.